

## Hadda waa in qof waliba qaataa mas'uuliyadiisa –mar haddi meesha laga saaray sharcigii 70+

Hadda hay'adda caafimaadka iyo xukuumadduba waxa ay meesha ka saareen sharcigii 70 jir iyo wixii ka da'weyn iyadoo weliba cudurkii dib usoo laba kacalaynayo. "Hadda waa in qof WALBA-ma'aha oo keliya dadka da'da ah waxa mas'uuliyadda qaadaya", sidan waxaa yiri wasiirka caafimaadka Lena Hallengren.

Markuu cudurkan karoonaaha soo baxay, dad badan baa u baahday iney si dheeraad ah isu ilaaliyaan. Dadka da'doodu ka weyn tahay 70-jirka (70+) iyo kuwa qaba xanuunno kale, waxa ay u jilicsan yihiin in ay qaadaan caabuqa Corona (covid-19).

Sidaa daraadeed xayiraadda ayaga waxa ay ku ahayd mid aad u adag. Waxa ay ahayd in aaney la kulmi karin dadka kale oo ay si walbaba u taxadaraan. Sidoo kale waxaa mamnuuc ahayd in lagu soo booqdo deegaanka ay daganyihiin ama cisbitaalka.

Laakiin kuwa badan oo dadka da'da ah aad bay ugu adkayd waqtigaa oo cidlo badan bay dareemayeen. Waxay aaminsanaayeen in aaney guriga ka bixin oo ay in badan gudaha ku jireen. Taas waxay u keentay dhibaato xaga maskaxda ah, maadaamaa ay waayeen noloshii is dhexgalka bulshada.

Laakiin hadda hay'adda caafimadku waxay tiri, sharciga waa loo simanyahay dhammaan. Xataa dadka da'da ah. Waxaase laga yaabaa in hadda sharcigii la fudu deeyay iyadoo hadda uun cudurkii soo kordhayo. Laakiin dadka intooda badan waa ay ogyihiin in laga fogaado dadka da'da ah meelaha dukaadamada iyo meelaha kale ee lagu kulmo. Taasi waxay keenaysaa in dadka da'da ahi ay bulshadii soo dhexgalaan, la kulmaan saaxiibadood caafimaadka qaba, soona lugo baxsadaan.

"Waa ineynu eegnaa qafka gebi ahaan caafimaadkiisa" sidaa waxaa yiri madaxa cudurada faafa Anders Tegnell. "Hadda mas'uuliyadda masaarna oo keliya dadka da'da ah iyo kuwa xanuunsan oo keliya" Hadda anagoo idil waa in aan is caawinaa".

Sidaa daraadeed ayaa sharciga "Xayiraadda qoyska" uu aad muhiim ugu yahay. Dhammaan dadka waaweyn ee wada deggan waa inay guriga joogaan hadii mid ka mid ahi iska helo cudurka. Ilmaha caafimaadka qaba ee dhigta dugsiyada xanaanada iyo kuwa hoose/dhexe (1-9) ayagu wey aadayaan iskuulkooda (qof weyn oo calaamaha cudurka lahayn, baa geynaya soona kaxaynaya).

Hadda arintu waa in gobol walba uu isagu go'aansadaa xayiraadiisa, *go'aamada khaaska ah*. "Haddii ay noqoto lagama maarman, sharciyo adag baa lagu soo rogi karaa gobolkoo idil ama qaybo ka mid ah gobolka", sidaana waxaa tiri Lisa Labbe Sandelin, oo ah dhakhtarka cudurada faafa ee Kalmar.



Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa. Warqadaan warbixinta waxaa soo saara xafiiska arrimaha degdega ee gobolka Kalmar. Warqadan "waxa ka cusub karoonaaha" labadii wiigba mar bay soo bixi doontaa xilliga xagaaga. Hadiise wax weyni dhacaan inka badan labadii wiigba mar bey soo bixi doontaa.



Borgholms  
kommun



facebook.com/krissamverkan.kalmar